

Tiibayda (qaaxada)

Tiibaydu (qaaxadu) waa xanuun ka dhasha bakteeriya. Sida caadiga ah tiibaydu waxay ku dhacdaa sambabada, laakiin waxay sidoo kale ku dhici kartaa qaybo kale oo jidhka kamida sida (tusaale ahaan lafaha, mergiyada ama maskaxda).

- Qaaxadu waa cudur la dawayn karo, lagana bogsado
- Shaybaadhka qaaxada iyo Dawooyinka qaaxada waa bilaash Norway gudaheeda


Sidee baa lagu qaadaa qaaxada?

Marka qof qaba qaaxada sanbabka uu qufaco ama hindhiso, waxa hawada ku fidaya bakteeriyada iyagoo ku jira dhibco yaryar oo aan la arkeyn. Dadka kale ee markay neefsanayaan sanko ay u galaan waxa uu qaadi karaan tiibayda. Bakteeriyada qaaxadu si fudud uma fido, waxa inta badan lagu kala qaadaa marka loo dhawaado qofka qaba, tusaale ahaan qof qoyska ka tirsan.

Calaamadaha Lagu Garto Qaaxada

Calaamadaha caamka ah ee lagu garto qaaxadu waa:



- qufac jira 2–3 usbuuc ama ka badan
- abateed la'aan
- miisanka qofka oo hoos u dhaca (waad dhuubanaysaa)
- qofka oo dareema tabar dari iyo daal
- qofka oo qandho muddo haysa ay qabato
- dhidid habeenkii ah
- barar ama fudhuudhuc cunaha, kilinkilada ama misigta dushiisa ah



Qofka isku arka hal ama dhowr calaamadahan ka mid ah calaamadahani, waxaa in uu u tagaa dhakhtarka.

Baaritaanka qaaxada (tiibisho) ee waajibka ah

Dadka qaar waxaa waajib ah inay maraan baaritaanka qaaxada/tiibishada. Tani waxay khusaysaa dad ay ka mid yihiin shaqaalaha ka imanaya dalalka ay qaaxada ku badan tahay, ee raba inay Norway joogaan in ka badan saddex bilood. Habka baaritaanku wuxuu ku xidhan yahay hadba meesha qofku ka yimi, wuxuuna ka koobnaan karaa sawirka raajada ah ee sambabada, baaris dhiig, baaritaan maqaar ama su'aalo ku saabsan raadracista qaadista infekshanka.



Ujeedada baaritaanku waa in la ogaado cudurka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah, si loo bilaabi karo daawaynta loogana hortago sii faafitaankiisa.